# Seygii Saaqidka Ahaa! (Qeybtii 6-aad)

**W.Q. Cabdicasiis Maxamad Shidane**
**Sebtember 12, 2016**

---

Markii ay I daashatay shaqo la'aantu, Kharduumna ay irridaha shaqada iga laabatay, ayaa waxaan soo gucday hilowgii hooyo Ceynabo iyo saaxiibtey Xulbado. Tan iyo in muddo ah xasuustooda waan is moogeysiinayay, maxaa yeelay, waxaan ogahay in xaaladdeyda murugsan aysan waxba ka qaban karin, walbahaar iyo kurbo hor leh in ay ku soo kordhiso mooyaane. Haseyeeshee intaa in ka badan way igu adagtahay in aan is moogaysiiyo hooyo macaan oo aan marwalba dareemayo codkeedii naxariista lahaa oo dhagahayga ku soo dhacaya.



Karti iyo tabar aan igu jirin ayaan iska raadiyay, si aan u waco hooyo, oo ah qof dhib ka soo martay korriimadeyda, una ahay ubadka qura ee ifka u jooga. Waxaan wacay goor aroor ah hooyo Ceynabo, kolkii ay codkeyga maqashay ayay ooyin la dhacday, waayo nolal iyo geeri midna iguma ogeyn, tan iyo markii aan ka soo cararay Muqdisho. Ka dib, markii aan isweydaarsannay dareenka illinta iyo hilowga xambaarsan, hooyo waxey ii sheegtay in seygaygii uu adduunyo isku qasay, oo wali uu dacwad iyo eed la daba taaggan yahay. Waxa uu gar qaab daran u dhigtay abtiyaal, taas oo uu igu eedeeyay in aan dahab ka xaday, oo aan hanti badan ka lunsaday, dahab kaasna uu ahaa ra'samaalkiisii dhammaa. Waxaa intaas u dheer fadeexadda iyo sumcad dilka uu suuqa u galiyay hooyaday, oo ah qof aan iyadu waligeed soo faragashan qoyskayga marwalbana igu waanin jirtay in aan reerkayga dhaqdo oo aan raaliya u noqdo saygayga.

Waxaa naxdin iyo qarracan igu sii abuuray markii ay hooyo ii sheegtay in gartii uu ku guuleystay seygayga, laguna soo gunaanaday in laba arrin midkood reerkayaga laga helo, kuwaas oo kala ahaa in reerkaygu gabadhii soo xero galiyaan, oo reerkeeda ay dhaqato, sida dhaqanka iyo caadadu tahay, ama in ay gudaan dahabkii ay xadday, maadaama xoolo rageed ahaa dahabku. Labada arrin midkoodna uma fududo qoyskayga. Waa midda koobaade, aniga waa wax aan marnaba iga suuroobeyn in aan dib ugu laabto aqalkii quursiga, bahdilka, iyo addoonsigu hareeyay si aan afo ugu noqdo mar kale seygii bahalka ahaa. Waa midda labaade, hooyadey iyo abtiyaashey



Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

ma ahan dad haysta hanti iyo dhaqaale u suurta galin kara bixinta dahabka been abuurka ah ee gabadhooda lagu sheeganayo. Fiicnaan lahaydaa in aan xado dahabkaas uu sheeganayo seygaygu, maxaa yeelay, waxaan heli lahaa lacag aan meeshii aan rabo ku tagi karo kagana raysan lahaa booyaysanimada iyo rafaadka aan ku jiro, waxaas oo war-xumo iyo fadeexad ahna ima dhibteen illeen waa wax aan u bareeraye.

Saaxiibtey Xulbado ayaan iyana wacay, maalin kale, si aan ugu yaraan u guto xiriirka saaxiibtinimo, una muujiyo abaalka taageeradii ay ii fidisay oo ah waxaan qalbigayga ka go'ayn. Qudheedu waxay ii sheegtay arrin kale oo naxdinteeda leh, kuna saabsan wiilkii Guray ee Kenya igu caawiyey iyo dhibkii uu kala kulmay ahelladii seygayga oo u dhigtay gar aan garasho iyo xikmad ku dhisneyn, laguna eedeeyay in uu yahay nin guursaday naag la qabo, in muddo ahna guri ku haystay, taasoo ah wax aan qaban oo uusan lug ku lahayn habayaraatee. Xulbado waxaa kaloo ay ii sheegtay in Gurey ay is ku gacan-qaadeen seygayga, mar uu si xun u aflagaadeeyay, ilaa xabsi la dhigay, ka dib, markii qaab musuqmaasuqa loogu adeegsaday booliska Kenyaatiga.

Dhawr habeen il iskuma geynin, ka dib markii aan wacay hooyo iyo saaxiibtay. Waxaa ii daarmayay oo aan dib u xasuusanayay muuqaalladii iyo qaabkii naxariista darraa ee uu seygaygu iila dhaqmi jiray, iyo sida ay hooyaday oo ah qof is ka afgaaban u saamaysay dhibaatadaydu. Si kastoo murugo iyo werwer badani u saaqday naftayda, haddana waxaan xoogga saaray in aanan is ku arkin qof fashilmay oo hamigeedii hog madaw ku dhacay, walow magaalada Kharduum iyo nolosheedu igu adkaatay. Shaqo la'aan iyo dad war iyo qabiil uun u heellan ayaan kala kulmay. Way ii cuntami weysay in aan ku sii jiro xaaladahaas isdiiddan. Xalka qura ee i horyaal waa in aan iskaga huleelo Suudaan, una dhaqaaqo dhinaca tubta tahriibka lamadagaanka (Saxaaraha) u dhaxeeya Suudaan iyo Liibiya.

Tab iyo talo toona ma hayo, qarash aan ku baxana haba sheegin. Dhallinyaradu waxay is ku caawinayaan hayb beeleed iyo aqoon shakhsi, aniguna qof dhaqanka noocaas ah u samaysan ma ihi, oo waxaan u arkaa dhaqan dibudhac iyo dullinimo ina baday. Talo ayaa igu caddatay oo wax aan sameeyo iyo cid aan u ciirsado midna ma garanayo. Geesinimo ayaan is ka baaray, waxaana si fool ka fool ah ugu tagay mid ka mid ah kuwa dadka dira, kana shaqeysta tahriibka. Waa nin afar naag ku dhex qaba Suudaan. Qaar safar sugayaal weeye, qaarna si rasmiya ayay ula noolyihiin. Waan u calaacalay. Waxaan u sheegay in aanan haysan wax qarash ah, meeshaanna in aan ka tago aan rabo, Alle dartii igu caawi, oo dadkaas aad habeen iyo maalin dirayso igu dar. Si dabacsan ayuu igu yiri, "waan ku caawinaa", isagoo su'aalo dhawr ah i weydiiyay, sida qabiilkayga, in aan xaas ahay iyo in aan leeyahay dad ehel ah oo dibadaha ku nool amaba hanti haysta oo dalkii jooga.

Cid aan Ilaahay ahayn oo aan wax ka sugayaa in aanay jirin ayaan u sheegay iyo inuu dar Alle igu caawiyo anna aan abaalkiisa gudi doono haddii aan meel nabad ah oo nolol cusub laga billaabi karo aan tago.

Aad ayaan u farxay markii uu ii sheegay in uu igu dari doono dad dhawaan bixi doona. Waxaan dareemay farxad iyo naxdin is huwan.Waa halis aanan ogeyn waxa


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

aan la kulmi doono, misana waan ku faraxsanahay, waayo meel aan joogo iyo mustaqbal midna ma hayo, waxaanay naftu diyaar u tahay in ay halis kasta u bareerto.

Waxay ahayd xilli casir liiq ah, boorsadii iyo sahaydii safarka loogu talagalay ma wato. Waa ka mamnuuc safarrada caynkaan oo kale ah in loo sahay qaato, oo culays fara badan lama rabo. Dhawr caag oo biyo ah iyo xirmooyin rooti qallalan ah ayaan u jeeday, oo ninka qabanqaabiyaha safarka ah uu sii saarayay gaariga aan raaci doonno. Waa gaari loogu talagalay in uu qaado tobban qof, balse, waxaan ku raacaynaa afartan qof, oo iskugu jirta dhallinyaro, ilmo, hooyooyin, iyo waayeel intaba. Dadka baabuurka fuushan wajiyadooda ayaan isha la raacay, waxaana iiga muuqday murugo iyo walbahaar weyn. Aniga waxaas oo dhib iyo dhalandhool ah waxaa i mariyay si aan uga fogaado saygaygii saaqidka aha ugana xorroobo addoonsigiisii, ee waxaan haddaba isweydiiyay tolow hooyooyinkan iyo waayeelkan iyana maxaa wada ee ay naftooda khatarta ugu biimaynayaan. Kollay duruuf uun baa ku kaliftay.

Waxaan ka soo dhaqaajinnay Khartuum, magaala madaxa Suudaan, annaga oo soo aadnay xaggaa iyo dhulkii lama dagaanka ahaa (Saxaaraha) ee u dhexeeyay Suudaan iyo Liibiya. Cirka iyo dhulka oo kaliya ayaan u jeednaa, wax kale nooma muuqdaan, geed, aqal, noole, ma noole, waxaas oo dhan ishayadu ma qabanayso. Waxaan dareemay in safar dhib iyo dhimashaba lagala kulmi doonaa in uu hadda ii billaabmay. Dhacdooyinka aan safarkan kula kulmay ma aha wax cusub. Waa wax aan adiga iyo aniguba in badan sheekadooda maqalnayama qaarkiinba soo maray. Waxay xaaladduhu iila ekaayeen sidii filim aan hore dhawr jeer u daawaday oo aan anigu hadda jilayaashiisa ka mid noqday. Maya, jilid laguma sheegi karo waayo waa dhacdooyin dhab ahaan ii soo maray, xanuunkooduna aanu xiskayga weligay ka bi'i doonin.




Haddaba markii aan jidka ku jirnay habeen iyo maalin, waxaan dareennay baahi iyo harraad, umana sheegi karno darawalka iyo kalkaaliyaashiisa, haddaan afka kala qaadno waa garaac iyo jir-dil, rakaabka qaarkiina neefta ayaaba ku dhegtay, ciriiriga jira awgiis, kuwana naf aan wali bixin ayaa ku rafanaysa. Labo maalin ka dib, waxaa naga dhintay qof waayeel ahaa, waana la tuuray maydkii annaga oo u jeedna, habluhu waxay la kulmayeen kufsi, iyo isku dhiidhiib isha laga wada daawanayay. Nasiib darro, kama badbaadin falkaas waxashnimada ah, waxaanan ka mid noqday gabdhihii la kufsaday, waliba dhawr jeer. Qofna kuma uusan dhiirran karin ka hadlidda xad-gudubkaas oo kufsiga ayaaba i qarso ah. Biyihii iyo rootigii yaraa waa sii gabaabsi, cid la miciin-bido malahan xilligaas, aan Ilaahay ka ahayn, qaarkeen waa miyir beeleen harraad iyo gaajo awgeed. Nafta uun baa nagu jirta ee waxba kuma noolin!

Saddax maalin ka dib, biyihii waa dhammaadeen, baabuurkiina waa jabay, qof kastana dhinac ayuu u dhacay, inta baabuurkii laga daatay, tab iyo tabari ma jirto, qof waliba wuxuu fiirinayaa cirka, isaga oo la koodaya Eebbehiisa, mid Alle u qeyladhaansada iyo mid Ciisa Masiix tuugaba. Dadku waxay kala aaminsanaayeen diimo kala gaddisan. labo ilmihii yaraa ka mid ah naftii ayaa daysay, ka dib markii


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

aan biyo uga dhignay kaadidii jirkeenna ka soo baxaysay, ilaa markii dambana xaalku gaaray in qof kasta waxii jirkiisa ka soo baxa naftiisa uu ku qabto. Darawalkii iyo caawiyaashiisii ayaa waxay u qayla dhaansadeen xaggaa iyo Liibiya, waxaa inoo yimid afar maalin oo baahi iyo saxariir ah ka dib, labo baabuur oo Liibiya laga leeyahay. Rajo ayaa na soo gashay, biyo ayay na siiyeen, balse, qaarkeen waaba tabar dhigay, oo far ma nuuxin karin. Qolyihii Liibiyaanku waxay naga codsadeen lacag aan caqliga galayn , si na loo geeyo Liibiya. Waxaan dareemay in aan qaybtii ugu xumayd ee saxariirta socdaalkayga aan lugta la galay. Waxaanu u gacan galnay qowlaysato bahalawday oo muuqaal bani aadmi leh haseyeeshee damiirkii iyo dadnimadii ka dhimatay. Hadda iyo madax-furasho!!

Qofkii lacagta ay codsadeen haysta waxaa loo sii gudbinaayay xaggaa iyo Liibiya, anigu Tumi iyo taano ma haysan, waxaan la kulmay wax kasta oo aad uga quusanayso micnaha dhabta ah ee ay leedahay bini’aadnimadu. Addoonsi toos ah! Muddo sagaashan maalmood ah markii nagula sameeyay wax kasta sida; garaac, kufsi, shaqo qasab ah, ayaa waxaa sida xoolihii nagula soo daadiyay daafaha magaallada “Kufra”. Meel aan u soconno ma naqaan, naf bixi weysay ayaa nagu jirta, waxaan biyo iyo wax afka la gashto weydiisannay muwaadin Suudaani ah, kaas oo na kaalmeeyay. Waxuu na siiyay biyo ay xididdadii qallalay ku qoyeen, calooshii marneydna ku diirsatay. Waxaa jiray waxa aan maskaxdeyda ka go’eyn mar kasta, oo i saameeyay nafsad ahaan, waa ilmihii iyo wayeelkii hortayda ku ruux baxay. Meesha aan joogno waa magaalada laga soo galo Liibiya, taas oo ka dhigan in socdaalkayga weli fari ka qodnayn. Qof kasta oo aad warbixin weydiisato wuxuu kaa rabaa lacag iyo in aad la gasho hishiis. Waa meel lacag keliyi shaqayso. Kii nin ahaa waxuu ku caqli iyo talo noqday shahwaddiisii, oo gabdhihii oo aad u liita ayayy ugaarsi kula dhaqaaqeen, iyaga oo uga faa’iidaysanaya xaaladdaas adag, kuna beer-laxawsanaya in ay geyn doonaan ilaa iyo magaala madaxda Liibiya Tripoli.

Anigu ciddii ma wici karo, oo shalay taladooda kuma soo bixin, xanuun iyo nafaqo-darrina waa i haysaa, qof shilin dhexda ka duleela i siinayana ma jiro, waa marka aan ku shallaayay “Alla muxuu naag kaaga dhigay?!”. Waxaan filayaa in qof kasta uu fahmi karo waxa aan uga danleeyahay hadalkaas. Aniga oo meel aan miciin bido haysan ayaa waxaan helay shaqo ah “Booyaasnimo” si aan uga urursado shilimaad ah aan ku sii wato safarkayga si aan badaha uga gudbo.

Bal maxaa i wada ee aan balaayada iyo hallaaga ugu bareerayaa. Dib ayaan uga fikiray wixii aan so maray iyo waxa hadda i sugaya. Waxaan isweydiiyay ma yihiin wax u qalma in aan waxaas oo dhib ah u maro si aan uga badbaado gumaysigii uu i baday saygaygu, bulshadun ku saaciday. Mise waxaan ahay qof aan fayoobayn oo kibir iyo waali waddo. Sidaad doontaba adigu u qaaddo kolloy hadda ma joogo meel aan ka soo laaban karo. Waxaan ku qasbanahay in aan xaalkayga furdaamiyo, labada dhinacna mid uun ku hagaago, “Nolal ama Geeri”.

Lix bilood ayaan booyaasad ahaa, balse, musiibo waxay dhacday markii gunnadii aan ku shaqaynaayay ay qoyskii Carbeed iga dafireen, iiguna yeereen Boolis, si xabsi la iigu dhaadhiciyo. Xeer iyo anshax iga celinaya qoyskaas ma jiro, mana ka shaqeeyo Liibiya, meel loo marana ma aqaan haddii uu jirana. Waxaa la ii dhaadhiciyay xabsi


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

ay ku jiraan ugu yaraan shan boqol oo qof, oo Soomaali iyo Itoobiyaan u badan. Xabsi rasmiya ma ahan, waa xarun ka mid ah xarumihii ay ku keydsan jireen hubka kiimikada ah Liibiyaanku. Cudurro halis ah ayaa nagu dhex faafay.

La soco qeybta 7 aad

W.Q. Cabdicasiis Maxamad Shidane
Email: shidane05@hotmail.com
-----

**Sidoo kale akhri**

Qeybtii 1aad
Qeybtii 2aad
Qeybtii 3xaad
Qeybii 4aad
Qeybtii 5 aad


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved